

# Qalab yar oo riqiis ah ayaa kaa caawin karaa xiriirka

Simple, Inexpensive Devices Can Assist in Communication—Somali Version

Badi dadku waxa ay isku raaci karaan in uu ilmuhu awood uleeyahay in uu sheegan karo wixii uu jecelyahay, necebyahay, ubahanyahay ama uu sheekan karo afkaartiisa waxa kale oo muhiim ah in waalidkood, walaaladood, iyo da'doodo fahmi karaan. Hadaba caruurta hadalku ku adag yahay, waxa hawl adag oo aad u culus ku ah xiriirka niyadjabna ku noqon kara.

Iyada oo ay jirto in hada ka hor la sameeyay hab wax lagu baro caruurta hadalku ku adag yahay, waxase hada jira qalab yar oo ka caawiya xaga xiriirka. Qalabka yar ee ku shaqeeya iligtiroonga ayaa waxa uu u fasaxaa caruurta in glaaska kula xiriiraan xaga ka qaybqaadashda, suaal waydiinta, iyo codsashadaba.

Qalabka caawimaadka (assistive technology) waxa ay ilmaha ka caawin kartaa siyaabo badan. Waxa ka mid ah caawimaadka xaga farta oo u ku fiiqo karo sawir, calaamad ama ashya kale; saxeexa; fara ka hadalka; sanqashada. Waxa kale oo ka mid ah khibrada hadalka kala gadisan, isticmaalka qalabka xiriirka, iyo koombiyuutarka. Habkaasina waxa uu u fudaydiyaa luqada caruurta hadalku ku adag yahay, iyo kuwa u baahan caawimaadka dheeraadka ah.

Maclimiinta ama waalidka u baahan in ay la xiriiraan ilmaha waxa ay ka bilaabi karaan khibradaha hore iyo wixii ay aqoon u leeyihiin. Qalab yar oo riqiis ah ayaa ilmaha waxtar wayn u noqon karaa. Istimmaalka qalabkana waxa lagu qiyaasi karaa inta jeer ee ilmuhu kuu jawaabo. Waxa kamid ah sida aqoonyahaniintu sheegeen in dadka wayni ay isticmaalaan hub ilmihuka qayb qaadan karo, sida ciyaarta, (dhuumaalaysega). Ka dibna aad isticmaasho erayo khafiif ah oo la fahmi karo. Calaamado ugu dar hadalada adiga farta ugu fiiqaya calaamadaha. Taasina waxa ay ilmaha u fasaxaysaa in uu dooran karo mar walba. Caruurta kale ee daawanaysa waxa ay isku day karaan in ay ka qayb qaataan taas oo xoojinaysa isdhexgalka.

Macalimiintu waxa hada ka hor ay isticmaalin farsamo yar oo ay ugu talagaleen in ay ka caawiyaan caruurta si ay u sheegan karaan

wixii ay rabaan. Laba hub oo isticmaaleen waxa kamid ah: (1) tilmaanka ama far ku fiiqa sawiro ku yaal qalabka loogu talagalay xiriiritaanka (sabuuraad, buug, ama ashya kale). (2) Calaamadaynta. Qalabka xiriiru waxa uu muujiyaa ashya, sawiro iyo qoral. Amaba waxa ay noqon karaan calaamado badan oo caan ah. Ilmuhu waxa uu tilmaami karaa calaamaduhu waxa ay yihiin. Waa hub aan qaali ahayn, laakiin u fasaxa ilmaha in uu cod yeesho. Ilmaha aan tilmaami karin hab kale oo qoraal ah ayaa jira. Waxa ilmuhu isticmaali karaa indhaha isaga oo indhaha ku geeraya calaamada loo baahanyahay in uu tilmaamo ama wxa kale oo jirta in uu isticmaali karo qalab yar oo iftiin bixiya. Caruurta qaarkoodna waxa ay isticmaali karaan meel la tuujiyo marka uu rabo in uu ka godbo calaamadaha qaarkood.

Hor umarka xaga farsamada ee dhawaan soo baxday, waa mid yar oo aan qaali ahayn (qaarkood waa \$100 ka yar) sida qalabka codka bixiya ee loogu talagalay ilmuhu inta uu yar yahay. Qalabkaasina waxa uu u shaqeeyaa sida cajalka laduubo oo kale.

Waxa jirta erayo lagu duubay, eray walibana uu leeyahay meel calaamadsan oo la la tuujiyo. Marka ilmuhu tuujiyo meel, waxa uu maqayaa cod sida cokie oo kale. Qalabka waxa uu xoojiyaa luqada, aragtida, codka, iyo taabashada. Erayo cod kala gadisan iyo heeso lagu duubay qalabka ayaa ilmuhu ku ciyaari karaa.

Codadka la doobaa waxa ay noqon karaan dhawr sakan ama daqiiqad, tass oo ku lug leh qalabka. Waxaana lagu duubi karaa ilaa 20 erayood. Waana labadali karaa marka larabo si dag dag ah. Qalabkuna waa luqa walba Igu duubi karo. Ilmuhuna waa uu ka qayb qaadan karaa xaga akhriska ('sida boga rog') ama ciyaar ('waa markaygii leexada') adiga dhawr sakon ku duubaya.

Xataa qalab yar oo cod bixiya ayaa ilmaha u awoodi karaa in xulasho iyo baahidiisa Iyo xaga luqadaba wax ka barto. Caruurta qaarkoodna waxa ay u gudbi karaan in ay awood u yeeshaan isticmaalka qalab qaali ah oo codka bixiya



Technical Assistance ALLIANCE  
for Parent Centers  
8161 Normandale Blvd.  
Minneapolis, MN 55437-1044  
952.838.9000  
952.838.0190 TTY  
952.838.0199 fax  
888.248.0822 National Toll-free  
alliance@taalliance.org

[www.taalliance.org](http://www.taalliance.org)

.....

(VOCA) amaba sida Koombiyuutarka oo kale (software). Qalab xaga xirritaanka oo qorshaysan (program) Lana wadan karo ayaa loo fiidiyaa kaas oo ka caawiya waxyaabo badan. Caruurta yaryari waxa ay u baahanyihiin meel nabadgalyo ah, dhiiri galina leh, si ay luqada u bartaan. Hub kasta oo ilmuhu ay kula xiriiran dadka kale waa in la dhiiri galyaa. Macalimiinta, kooxaha waxqabadka, iyo waalidkuba waa in ay wadajir isgu dayaan in ay sameeyaan hab ay caruurta kula xiriiri karaan. Waana in ay qiimeeyaan ilmaha baahidiisa, kartidiisa, waxa uu jecelyahay, iyo waxyaabha uu la darso maalin kasta. Taasina waxa ay ka caawin kartaa si qorsho xiriiritaan hor umar leh loogu dajiyo.

Waxa ku jira faa'iido badan in ilmaha laga caawiyo xaga hadalka. Caruurta hadli karta waxa ay awood u leeyihiin siyaabo badan in ay daka kula xiriiraan. Waxa ay sheegan karaan waxa ay rabaan ama ay jecelyihiin. Waxa ay sheegan karaan ula jeedooda. Taasina waxa ay u fasaxdaa qofku in uu fahmo si uu wax ugu qabto ilmaha. Dabeecada ilmuhuna way isbadashaa kolba sida uu ula xiriiyo ama wax u baranyo. Awooda ilmuhu u leeyahay in uu hadli karo waxa ay xoojisaa kalsoonida iyo dhiiranaanta.